## Talooyin Waxtar leh

- Da'da 4 ilaa 7 waa wakhti muhiim u ah barashada akhriska.
- La akhri ilmahaaga 20 daqiiqo maalintii. Akhrista, dhegeysiga, iyo falanqaynta akhri.
- Taabo eray walbo marka aad aqrineyso. Midkan "iskugu-aad-aadi mid-ka-mid" tusi sidaan u aqrino erayada shaqsiga iyo in laga so bilaabo bidix loona wado midig.
- U farmuuq erayada farta yar-yar iyo erayda farta waaweyn.
- Tusi ilmahaaga in erayadu ay yihiin xarfo leysku keen keenay.
- Waxaad tusisaa isbeeska u dhaxeeyo erayada. Waxaad tani ku muujin kartaa adigoo ku qorayo jumlad warqad kadibna weydinaya ilmahaaga in uu daawado sida aad jumlada erayo uuga sameyneyso.
- Waxaad tirisaa tirada erayda ku jiro jumlada ama u sacbi eray walbo oo uu ku dhawaaqo.
- Kor ugu aqri erayadaaad maalin walbo nolasha ku aragto.
- Waxaad u far muuqda calaamadaha-joogsiga kadibna usheeg magacooda.

### Su'aalaha la waydiiyo macalinka ilmahaaga:

- Waa maxay waxyaabaha uu ilmahaygu ku fiican yahay?
- Xirfado noocee ah ayuu ilmahaygu u baahan yahay inuu guriga kaga shaqeeyo?
- Sideed ugu taageertaa ilmahayga fasalka dhexdiisa?
- Goorma ayaan kulmi karnaa si aan uga wada hadalno horumarka ilmahayga?

## Ku saabsan ACSB

ACSB waxay u heellan tahay wada shaqaynta guud ahaan Waaxda Waxbarashada iyo Horumarinta Carruurnimada Hore iyo ardayda, qoysaska, iyo bulshada si loo dhiso nidaam waxbarasho oo Nova Scotian ah oo loo siman yahay, dhaqan ahaan u jawaabaya, iyo jawi waxbarasho oo ammaan ah dhammaan ardayda.

Tiirarka **Qaabdhismeedka Waxbarashada Nova Scotian Afrika** dulmar mawduucyada muhiimka ah ee lagama maarmaanka u ah si wax looga qabto caqabadaha habaysan ee waxbarashada, u oggolaanaya ardayda ANS/Madow in la maqlo, la arko, la dhiirigeliyo, lana taageero si ay u gaadhaan ballanqaadkooda iyo kartidooda.




### Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

**Laanta Adeegyada Afrikaanka ee Waaxda Waxbarashada ee Nova Scotia iyo Horumarinta Carruurnimada Hore**
4th Goobta Floor Brunswick
2021 Brunswick Street / PO Box 578
Halifax, Nova Scotia B3J 2S9
(902) 424-3151
acsb@novascotia.ca



# Xoojinta WAALIDKA IYO QOYSKA

## Fikradaha Daabacaad



NOVA SCOTIA

## Qaali Waalidiin iyo Masuuliyadiin,

Ku Soo Dhawoow Waxbarasho Loo Dhan Yahay! Anagoo ah macalinka koowaad iyo u doodaha ilmahaaga, waxaanu aqoonsanahay doorka muhiimka ah ee aad ka ciyaarto waxbarashada ilmahaaga. Sababtaas awgeed, Awood-siinta Waalidiinta iyo Qoysaska waa mid ka mid ah shanta tiir ee Qaab-dhismeedka Waxbarashada Nova Scotian ee Afrika.

Ficilkeenu waa ula kac. Waxaan ku dadaalna in aan abuurno fursado aan adiga kugu dhiiro galineyno, nidaamka taagero ee ilmahaaga, ka masuulka muhiimka ah ee go'aamiyaha ah marka ay timaado qorsheynta iyo taagerida ilmahaaga. Tan waxa lagu gaadhi karaa iskaashi dhab ah oo wada shaqayneed oo ka dhexeeya guriga, dugsiga, iyo bulshada taageerta oo xoojisa wanaagga iyo guusha ubadkaaga. Si tani looga guul gaaro hiigsiga, waxaan bixineyna warbixin, agab, iyo tobabaro.

Waxaad u isticmaali kartaa buug-yarahaan si aad u kordhiso wacyigaada heerka wax-akhriska, iyo dabeecadaha wax-akhriska ee la raadinayo markaad ilmahaaga wax ku akhrinayso guriga. Daloolin cidhif ah ayaa lagu daray taasoo kuu ogolaanaysa inaad si fudud u kala saarto dabaylaha. Waxaad talooyinka waxtarka leh dhigi kartaa meel si heersare ah loo arki karo, sida albaabka qaboojiyaha, xusuusin inaad wax akhrido oo aad madadaalo leedahay!

Adiga xagga waxbarashada,

**Laanta Adeegyada Afrikaanka ee Kanada (ACSB)**

**"Sankofa"** waxaa laga soo qaatay luqadaha Akin Twi iyo Fante ee Ghana, si dabacsan macneheedu waa "in la soo saaro."
Fikradda waxaa matalaya shimbirta Sankofa, oo leh lugaha oo hore u soo jeeda oo madaxu u jeestay si uu u soo saaro ukun dhabarka ku yaal. Astaanta waxaa lagu soo bandhigay agabka ACSB si ay xasuusin u noqoto "si aan u fahanno hadda oo aan u xaqiijino mustaqbalkeena, waa in aan ogaano wixii hore."




## Waa maxay fikradaha daabacaad?

Fikradaha daabacaad waxaa loola jeeda fahamka assaasiga ah ee sida daabacada iyo buugaaga u shaqeyaan. Sida uu ilmahaagu u baranayo sida wax loo aqriyo, waxa ay fahmayaan dabciyada iyo shaqada farta qoraal loo yaqaano "fikradaha daabacaada."



### Fikradaha daabacaad waxaa kamida:

- sida buug loo qabsado
- buugaagtu in ay leeyihiin bog hore, bog danbe, ciwaan, iyo qoraa
- halka laga bilaabo aqrinta bog
- in aan kasoo aqrino bidix anago u socono midig
- in aan aqriska kor kasoo bilaawno ilaa hoos
- in aan aqrino ilaa dhamaadka jumlad
- in ay jiraan xarfo far yar-yar iyo xarfo far waaweyn
- in erayadu xarfo ka sameysan yihiin
- in jumladu ka sameysan tahay erayo
- in ay jiraan isbees u dhaxeyo erayada
- in jumladuhu leeyihiin calaamado-joogsi
- dabacaadu ay tahay wax aan aqrino oo micno wado

## Dhamaadka-Sanad Fikradaha Daabacaad ee Fasallada Assaasiga ilaa 1

### Asal ahaan

**Fikradaha Daabacaada:**

- garashada bogga hore iyo bogga danbe ee buuga
- u gadinta bogaga dhanka saxda ah
- garashada halka laga bilaabo aqrinta bog
- u raacida erayada bidix ilaa midig iyo kor ilaa hoos
- far muuqida isbeeska u dhaxeyo erayada si aad ugu muujiso halka uu mid ku dhamaado erayga xigana ka bilaawdo
- far muuqida hal eray marka aad ku hadleyso (adigoo eray walbo dhawaqa la muujinaya)

### Fasalka 1

**Fikradaha Daabacaada:**

- ka hadlida xarfaha (magaca xaraf walbo, dhawaqa uu xarafkan u tagan yahay, i.w.m)
- ka hadlida erayada (koox xarfo ah ayuu eraygu ka sameysan yahay, xarfaha ku jira eray ayaa mar walbo hal qaab u socdo, i.w.m)
- ka hadlida jumladaha (koox erayo ah ayee jumladu ka sameysan tahay, jumlado waxa ay wada fariin, waxaana jiro isbees u dhaxeyo erayada i.w.m)

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dabeecadaha akhriska ee heerarka akhriska ee kala duwan, booqo qaybta manhajka ee shabakada EECD: https://curriculum.novascotia.ca.

**Buug-yaraha kale ee taxanahan waxaa laga heli karaa qaybta daabacaadda ee mareegaha ACSB ee www.ednet.ns.ca/acs/home.**